DEPARTMENT OF NATURAL RESOURCES

OAI-Civil rights complaint form
01-2025

# Foomka Cabashada Midab Takoorka

Cabashada waa in la gudbiyaa mudo **hal sano gudahood** laga bilaabo taariikhda dhacdada la tuhunsan yahay ee midab takoorka.

**Haddii cabashada lagaga cabanayo Sarkaal Kaydinta DNR:**
Haddii cabashada lagaga cabanayo Sarkaal Kaydinta DNR, fadlan ha **isticmaalin** foomkan. **Buuxi oo saxiix foomka Cabashada Dhaqan-xumida Sarkaalka,** [the Complaint of Officer Misconduct Form], kadibna foomkaas oo la buuxiyey lana saxiixay ku soo dir cinwaankan boostada ee hoos ku qoran:

DNR, Division of Law Enforcement
500 Lafayette Road, Box 47
St. Paul, MN 55155-4047

### Haddii takoorka la tuhunsan yahay uusan ka imaan Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah (DNR):

Haddii takoorku ka dhacay gudaha gobolka Minnesota, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad la xiriirto Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota Minnesota Department of Human Rights (MDHR) ama aad wacdo Khadka Caawinta Takoorka ee MDHR lambarka 1-833-454-0148. Markaad wacdo, waxaa lagu heli karaa adeegyo turjumaan/tafsirid ah.

Foomkan waxa uu si buuxda ugu habboon yahay akhristayaasha shaashadda, taasoo u suurtagelinaysa dadka naafada ah ee aragga inay si madax-bannaan u dhex maraan foomka ugana buuxin karaan iyadoo la adeegsanayo tiknoolajiyada taageerada. Sidoo kale, waxaa diyaar ah taakulayn gaar ah oo loogu talagalay dadka maqalkoodu xaddidan yahay, sida adeegyada relay-ga ama qaabab kale oo la heli karo, haddii la codsado.Haddii aad qabto su'aalo, aad u baahan tahay taageero dheeraad ah oo la xiriirta helitaanka foomkan, ama aad u baahan tahay foomkan qaab kale oo la heli karo sida daabacaad far waa weyn ah, foom la akhriyi karo, duubis cod ah,ama kaalmo luqadeed sababo la xiriira xaddidaadda aqoonta af Ingiriisiga,Fadlan la xiriir Kooxda Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah (DNR) adigoo u diraya iimayl cinwaanka CivilRights.DNR@state.mn.us.

## Ogeysiiska Asturnaanta

Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah (DNR) waxay kaa codsanaysaa inaad bixiso macluumaad ku jira foomka cabashadaan, oo ay ka mid yihiin xog gaar ah iyo/ama xog sir ah, sida uu tilmaamayo Xeerka Maaraynta Xogta Dowladda ee Gobolka Minnesota. DNR waxay macluumaadkan gaar/sirta ah u baahan tahay si ay u baarto ugana jawaabto eedeymaha takoorka. Sharcigu kuguma qasbayo inaad bixiso macluumaadkan. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan bixin macluumaad ku filan, DNR waxaa laga yaabaa inaysan awoodin inay si habboon u baarto cabashadaada.

Macluumaadka aad bixiso waxaa isticmaali doona shaqaalaha DNR ee shaqadoodu si macquul ah u baahan tahay inay helaan xogtan. Dadka iyo hay'adaha kale ee leh xaq sharci ah inay helaan xogtan waxaa ka mid ah: wakiilka kaliya ee matala shaqaalaha DNR ee noqonaya kuwa lala xiriiriyo baaritaanka cabashadaada; garsooraha garnaqsi haddii ciqaab la saaro shaqaalahaas lana geeyo dacwadooda garnaqsi; Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota; Xafiiska Kormeeraha Sharci-dejinta ee Minnesota; hay'adaha fulinta sharciga iyo xeer-ilaaliyeyaasha; shaqsiyaadka ama hay'adaha lagu magacaabo amar maxkamadeed; shaqsiyaadka ama hay'adaha aad adigu oggolaato; iyo qof kasta ama hay'ad kasta oo uu oggol yahay sharci goboleed ama mid federaal ah.

Fadlan dooro hadalka hoose si aad u xaqiijiso in aad akhriday oo aad fahamtay Ogeysiiskan Asturnaanta.

☐ Waxaan akhriyey oo fahmay Ogeysiiskan Asturnaanta.*

## Macluumaadkaaga Shaqsiga ah

* Micnaheedu waa meel qasab ah in la buuxiyo.

Ma dareentay in lagugu takoorey Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah ee Minnesota ("DNR"), hay'adaha hoos yimaada, la-taliyeyaasha, ama qandaraaslayaashee?* ☐ Haa ☐ Maya

**Magaca Kowaad** *: ______ **Magaca Dambe***: ______

**Lambarka Taleefanka***: ______ **Cinwaanka Iimeylka***: ______

**Habka Xiriir ee la doorbido*:** ______

**Cinwaanka:** ______

**Magaalada:** ______ **Gobolka:** ______ **Koodhka Boostada:** ______

**Waqtiga ugu habboon ee lagula soo xiriiro:** ______

**Ma ku matalaa qareen?*** ☐ **Haa** ☐ **Maya**

**Ma u gudbisay cabashadan hay'ad dowladeed oo kale?** ☐ **Haa** ☐ **Maya**

## Sababta Midab Takoorka

Waxaan aaminsanahay in la igu takoorey sabab la xiriirta (xulo dhammaan kuwa khuseeya):*

☐ Jinsi
☐ Midab
☐ Qaran
☐ Asal
☐ Diin
☐ Jinsigaaga
☐ Jinsi-doorasho
☐ Aqoonsiga Jinsiga
☐ Da'
☐ Xaaladda Guurka
☐ Xaaladda Qoyska
☐ Naafonimo
☐ Hawlaha Guddiga XuquuqdaAadanaha ee Deegaanka
☐ Xaaladda la xiriirta Kaalmada Dadweynaha
☐ Mid Kale

Haddii "wax kale" jiraan fadlan sharax

______

## Macluumaadka Hay’adda, Ganacsiga, ama Qandaraaslaha lagu eedeeyay Midab Takoorka

**Taariikhda uu Dhacay Midab Takoorka*:**

**Taariikhda Ugu Dambeysay ee Takoorka (haddii ay ka duwan tahay tan kor ku xusan):**

**Magaca Hay’ad, Ganacsi, ama Qandaraasle:**

Lambarka Taleefoonka:

**Cinwaanka:**

**Magaalada:** **Gobalka:** **Koodhka Boostada:**

**Magacyada iyo Jagada Shaqada ee Qof(af)ka lagu eedeeyay Takoorka:**

## Noo sheeg waxa dhacay

Fadlan si faahfaahsan u sharax waxa dhacay, cidda ku lug lahayd, iyo sida adiga ama dad kale loogu takoorey. Haddii loo baahdo, fadlan la socodsii nuqul ka mid ah qoraallada, muuqaallada, sawirrada, ama agab kale oo la xiriira cabashadaada oo foomkan ku lifaaqan.*

## Waa maxay natiijada aad doonayso?

Fadlan si kooban u sharax sida aad jeclaan lahayd in arrintan loo xalliyo.

## Gudbin

Ku lifaaq wixii agab ah ee la xiriira cabashada* ☐ Haa ☐ Maya

☐ Adigoo calaamadinaya halkan, waxaan fahamsanahay in calaamadani ay u dhiganto saxiix sharci ah oo xaqiijinaya in anigu, qofka foomkan gudbinaya, aan dammaanad qaadayo run ahaanshaha macluumaadka la bixiyay.

**Magaca:** ______ **Taariikhda Gudbinta Cabashada:** ______

Ugu dambeyn fadlan gudbi foomkan iyo dhammaan dukumentiyada la xiriira cabashadan:

1) Iimeyl u dir CivilRights.DNR@state.mn.us

**Ama**

2) UDir foomkan iyo agabka kale

cinwaanka hoos ku xusan

Yumi Finney, Isuduwaha Xuquuqda
Madaniga ah Xafiiska Helitaanka iyo
Isdhexgalka
500 Lafayette Road
St. Paul, MN 55155

Mahadsanidiin.